نواقض الإسلام

WAXYAABAHA ISLAAMKA BURRINAYA

Salaanta Islaamka kadib; Qaar dhallinyarada akhristayaasha ah ka mid ah ayaa inoo soo gudbiyay qoraalka hoos ku qoran ee ay wasaaradda diinta Sacuudigu ku tilmaantay in ay qodobadaas tobanka ah yihiin waxyaabaha burrinaya Islaamka ayaga oo ina waydiisatay in aan aragtideenna ka dhiibanno si aan Muslimiinta ugu caddayno waxayaabaha ay wahhaabiyadu isku khaldayso, sidaa darted, waxaan leenahay:

Qodobka 1aad:

الأول : من النواقض العشرة : الشرك في عبادة الله ، قال تعالى : ﴿إِنَّ اللَّهَ لَا يَغْفِرُ أَنْ يُشْرَكَ بِهِ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَلِكَ لِمَنْ يَشَاءُ﴾ وقال تعالى : ﴿إِنَّهُ مَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَقَدْ حَرَّمَ اللَّهُ عَلَيْهِ الْجَنَّةَ وَمَأْوَاهُ النَّارُ وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ أَنْصَارٍ﴾ ومن ذلك دعاء الأموات والاستغاثة بهم والنذر والذبح لهم .

Qodobka koobaad ee ay dhaheen Shirkiga, sida ay u qeexeen ayaa khaldan, maxaa yeelay waxay uga jeedaan baryada la baryayo wax aan noolayn iyo istiqaathada iyo nadarka iyo xoolaha loo bireeyo, arrinkaasna wuxuu u baahanyahay faahfaahin.

Sida uu sheikh Sulaymaan bin Cabdulwahhaab ugu caddeeyay kitaabkiisa (as-sawaaciq al-ilaahiyah fi ar-radd calal wahhaabiyah) wuxuu yiri arrinkaas qof muslim ah lagu kufrin mayo wuxuuna soo daliilsaday hadalka culumada oo xataa uu ku jiro ibn Tymiyyah iyo ibn Qayyim, wuxuuna yiri: kufriga la sheegay maaha midka diinta ka bixinaya ee waa kufrun-duuna kufrin, qofkii caamo ah ee sidaa sameeyana la kufrin mayo ee waa la waaninayaa waxaana la barayaa diinta.

Hadaba arrinka ah baryada wax aan noolayn, kufri maaha waana bannaanyahay, aayadda ay soo daliilsadeenna arrinkan ma khusayso, taa daaye waxaaba jira axaadiis bannaynaysa oo ay culumadu sharxeen eeg:

1. Aayadda quraanka ah ee (al-Maa'iddah: 35) ee caddaysay in wasiiladu bannaantahay (Macnaha in addoonka iyo Ilaahay dhexdooda ay gelikaraan wax kale oo wasiilo ah) arrinkaasina wuxuu caddaynayaa in aanay shirki ahayn oo aanay kufri ahayn in addoonku ku tawasulo wax kale oo aan naftiisa ahayn asiga oo rejaynaya in uu sidaa Eebbe ugu dhawaan doono.

Wahhaabiyada lafteedu arrinkaas way ogolyihiin oo ma diidana, laakiin waxay ku andacoodeen in lagu tawasuli karo (camalkaaga iyo qof jooga oo nool!!) annaguna waxaan leenahay daliilka aad aayadda ku xaddideen aaway? haddii aan daliil cad oo aayadda xaddidaya la hayn aayaddu waa mudlaq oo waxay koobaysaa kuwa nool iyo kuwa aan noolayn iyo camalka iyo dadka iwm

dhammaan. Marka ayaga ayaa daliil laga rabaa caddaynaya xaddididda aayaddaas, mana hayaan.

2. Axaadiista ku soo aroortay: (Majmac az-zawaa'id, juzka:10, bogga:132, iyo Musnad abi-yaclaa: juzka 9aad, bogga: 177, iyo al-Mucjam al-kabiir, ee Dabari, juzka:10, bogga:217, iyo al-Firdows, juzka 1aad, bogga 330, iyo Faydul qadiir, juska 1aad, bogga 307) culumada kutubtaas qortay oo dhan waxay tilmaameen xadiiska leh: Haddii qofkiin neef ama xoolo ka dhumaan ama ka fakadaan ha yiraahdo "addoomaha Ilaahayow qabta", culumaduna waxay dhaheen addoomaha Ilaahay waxaa looga jeedaa Malaa'ikta iyo jinniga iyo wixii kale ee uunkiisa ka mid ah oo wax nool iyo wax aan noolayn iyo wax aan arkayno iyo wax aanan arkayn intaba leh.

3. Waxaa kale oo addillada bannaynaysa tawasulka iyo istiqaathada ka mid ah xadiiska dabaraani uu soo weriyay ee uu saxay ee ku jiray qisadii ninkii indhoolaha ahaa.
4. Xaddiiska uu imam Bayhaqi ka soo weriyay Maalik ad-Daar ee leh in uu ku tawasulay qabriga nabiga nnk ha ahaatee, xadiiskan oo uu imam bayhaqi saxay waxaa duray wahhaabiyada siiba al-Baani, waxayna xujo ka dhigteen in maalik ad-Daar majhuul yahay oo aanan la aqoon! waxaanna ugu jawaabaynaa:
    A. Horta al-Baani xaq umalaha in uu xaddiiska saxo ama khaldo, maxaa yeelay xaafid maaha, arrinka sixidda xadiiskana xufaadda ayaa ku shaqo leh sida ibn Xajar iwm.
    B. Imaam Bayhaqi iyo al-Baani , annagu imam Bayhaqi ayaan ku kalsoonnahay, maxaa yeelay wuuna ka horreeyay wuuna ka cilmi badanyahay waana xaafid muxadis ah, sidaa darted, kol haddii uu Bayhaqi saxay annagu asiga ayaan qaadanaynaa sixiddiisii.
    C. Tan saddexaad, ninka ay dhaheen waa majhuul wuxuu ka mid ahaa shaqaalihii Imaam Cumar bin al-Khaddaab, waxaanna ognahay in aanan imam Cumar qof xun shaqaalaynayn, sidaa darted, Maalik ad-Daar wuxuu ahaaba nin fiican oo caadil ah in uu ahaa shaki kuma jiro, maxaa yeelay haddii uu xunyahay Imaam Cumar shaqo uma dirsadeen.

Sidaa darted, qodobka 1aad ee ay ku magacaabeen (Nawaaqidul Islaam) waa qodob been ah, shirkigana sida aad garanayso kama mid aha waxyaabaha ay sheegeen, ee shirkiga ay aayadaha ay soo qoreen sheegayaan waa midka culumadu sheegtay ee ah (In Ilaahay cid kale lala caabudo) sidii ay yeeli jireen mushrikiintii Carabta ee joogtay intii aanan Islaamku soo bixin.

Qodobka 2aad:

الثاني : من جعل بينه وبين الله وسائط يدعوهم ويسألهم الشفاعة ويتوكل عليهم فقد كفر إجماعا .

Waxay dhaheen qofkii Ilaahay iyo asiga dhexdooda wax kale gelsha ee ku tawasula wuu kufrinayaa (Ijaamacan).

Qodobkan waa laysaga jeedaa in uusan sal iyo baar lahayn, maxaa yeelay aayadda quraanka ah ee aan sheegay ayaaba caddaynaysa in wasiiladu bannaantahay, ijmaacna wax la yiraahdo meeshaa ma yaallaan ee waxay ka wadaan ijmaaca wahhaabiyada, xataa ibn taymiyah iyo ibn cabdilwahhaab tawasulka ma diidin, xataa wahhaabiyada lafteedu tawasulka qaar way ogoshay, laakiin subxaana laahi, bal fiiri sida ay isu burrinayaan, marna waa bannaanyahay bay leeyihiin marna waa kufri bay leeyihiin!!

Qodobka 3aad:

الثالث : من لم يكفر المشركين أو شك في كفرهم أو صحح مذهبهم كفر .

Waxay dhaheen (qofkii aan mushrikiinta kufrin ama ka shakiya in ay kufaar yihiin iyo inkale, ama mad-habtooda saxa):

Halkan waxay isku khaldayaan laba arrinmood, (Mushrikiin) sida aan ognahay wahhaabiyadu waxay uga jeedaan (Muslimiinta) aanan wahhaabiyada ahayn, marka taas annagu ma aqbali karno.

Haddiise ay uga jeedaan mushrikiinta caadiga ah ee Ilaahay cid kale ula shariig yeelay, maxay qodobkan ugu soo celsheen sow qodobka 2aad kuma filnayn iyo waliba midka 1aad.

Saddexda qodob ee aan ilaa iyo hadda soo aragnay dhammaan waxay ka sheekaynayaan shirkiga!! marka sababta ay ugu soo celcelinayaan waa in ay (Mushrikiin uga jeedaan ciddii aanan wahhaabiyo ahayn).

Qodobka 4aad:

الرابع : من اعتقد أن هدي غير النبي صلى الله عليه وسلم أكمل من هديه ، أو أن حكم غيره أحسن من حكمه كالذين يفضلون حكم الطواغيت على حكمه فهو كافر .

ويدخل في القسم الرابع من اعتقد أن الأنظمة والقوانين التي يسنها الناس أفضل من شريعة الإسلام ، أو أن نظام الإسلام لا يصلح تطبيقه في القرن العشرين ، أو أنه كان سببا في تخلف المسلمين ، أو أنه يحصر في علاقة المرء بربه دون أن يتدخل في شؤون الحياة الأخرى ، ويدخل في الرابع أيضا من يرى أن إنفاذ حكم الله في قطع يد السارق أو رجم الزاني المحصن لا يناسب العصر الحاضر ، ويدخل في ذلك أيضا كل من اعتقد أنه يجوز الحكم بغير شريعة الله في المعاملات أو الحدود أو غيرهما وإن لم يعتقد أن ذلك أفضل من حكم الشريعة؛ لأنه بذلك يكون قد استباح ما حرم الله إجماعا ، وكل من استباح ما حرم الله مما هو معلوم من الدين بالضرورة كالزنا والخمر والربا والحكم بغير شريعة الله فهو كافر بإجماع المسلمين .

نعوذ بالله من موجبات غضبه وأليم عقابه وصلى الله على خير خلقه محمد وعلى آله وصحبه وسلم .

Qodobkan haddii ay uga jeedaan qofkii dastuur wax ku xukuma la kufrin mayo haddii uusan aaminsanayn in aanan Islaamku waxba anfacayn, laakiin haddii uu aaminsanyahay in dastuurka dadku qoreen ka fiicanyahay shareecada Islaamka wuu kufrinayaa. Hadalka ay kor ku qoreen ee faraha badanna wax daliil ah looma hayo.

Qodobka 5aad:

الخامس : من أبغض شيئا مما جاء به الرسول صلى الله عليه وسلم ولو عمل به فقد كفر لقوله تعالى : ﴿ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَرِهُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأَحْبَطَ أَعْمَالَهُمْ﴾ .

Qodobkan ay dhaheen (qofkii karaahsada ama nacbaada) wax ka mid ah waxyaabihii nabigu nnk la yimiday wuu kufrinayaa, wuxuu u baahanyahay sharax.

Tusaale ahaan haddii qof la yiraahdo tuko ee uu yiraahdo tukan mayo! Judhiiba la kufrin mayo, maxaa yeelay "**tukan mayo**" dhowr macne ayay leedahay:

A. Tukan mayo oo waan tukaday.

B. Tukan maayo oo caajis iyo wehsi ayaan la toosi la'ahay.

C. Tukan mayo hadalkaaga awgiis.

D. Tukan mayo maxaayeelay waajib maaha.

Afartaas ayay noqon kartaa, midda ugu dambaysa ayaana lagu kufrinayaa, inta kale kufri maaha. Marka bal u fiirso sida ay hadalka isugu duubayaan ayaga oo aanan kala faahfaahin. Taasna culumadu waxay dhaheen sababta loo kufrinayo waa in uu beenshay quraanka ee wax kale maaha, marka qodobkan shanaad ee ay sheegeen waxaa kuu cad in uusan ahayn wax meesha ku jira.

Qodobka 6aad:

السادس : من استهزأ بشيء من دين الرسول صلى الله عليه وسلم أو ثوابه أو عقابه كفر والدليل قوله تعالى : ﴿قُلْ أَبِاللَّهِ وَآيَاتِهِ وَرَسُولِهِ كُنْتُمْ تَسْتَهْزِئُونَ لا تَعْتَذِرُوا قَدْ كَفَرْتُمْ بَعْدَ إِيمَانِكُمْ﴾ .

Qodobkan waa sax, waana la isku raacsanyahay.

Qodobka 7aad:

السابع : السحر ومنه الصرف والعطف فمن فعله أو رضي به كفر والدليل قوله تعالى : ﴿وَمَا يُعَلِّمَانِ مِنْ أَحَدٍ حَتَّى يَقُولَا إِنَّمَا نَحْنُ فِتْنَةٌ فَلَا تَكْفُرْ﴾ .

Sixirka barashadiisa iyo faliddiisa culumadu way kala saareen, haddii uu qofku sixirka barto asiga oo doonaya in uu sixir kale ku burriyo ama ku furdaansho ama uu u barto si uu dadka uga digo shrtooda, waxba kuma jabna culumaduna way banneeyeen, kufrina maaha. Laakiin haddii uu u barto si uu dadka ugu sixro ama ugu dhibaateeyo waa kufrinayaa.

Qodobka 8aad:

الثامن : مظاهرة المشركين ومعاونتهم على المسلمين والدليل قوله تعالى : ﴿وَمَنْ يَتَوَلَّهُمْ مِنْكُمْ فَإِنَّهُ مِنْهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ﴾

Qodobkan haddii ay mushrikiinta uga jeedaan gaalada mushrikiinta ah waa run, laakiin haddii ay mushrikiinta uga jeedaan muslimiinta aan wahhaabiyada ahayn waa khalad waana beentood. Maxaa yeelay muslimiinta aan wahhaabiyada ahayn mushrikiin maaha, inkasta oo wahhaabiyadu ku tilmaanto mushrikiin.

Tan kale waxaa la yaab leh in ay qodobkan halkan ku xuseen, maxaa yeelay ayaga ayaaba iskufrinaya, sida aan ognahay wahhaabiyadu ayaga ayaa gaalada kaashanaya oo garabsanaya una kaalmaynaya, sida aan ognahay Ingiriiska iyo Maraykanka ayay xiriir fiican la leeyihiin wahhaabiyadu, oo sida aan ognahay wahhaabiyada Ingiriiska ayaa aasaasay, dagaallada oo dhanna way isla galeen sida aan ku aragnay dagaalkii Ciraaq iyo maraykanka iyo Ingiriiska way iskaashadeen, kii afqaanistaanna way iskaashadeen!! Marka waxaa la yaab leh in uu qodobkan ayaga ku soo noqonayo laakiin aanay fahmayn! Maxaa yeelay muslimiinta inteeda kale wax mushrikiinta kaashada ama kaalmeeya kuma jiraan.

Taas ayaa kolka inoo caddaynaysa in ay mushrikiin uga jeedaan “muslimiinta” aan wahhaabiyada ahayn!! Marka bal u fiirso sida ay aayadda u taxriifinayaan oo ay u leexinayaan, subxaanalaahi.

Qodobka 9aad:

التاسع : من اعتقد أن بعض الناس يسعه الخروج عن شريعة محمد صلى الله عليه وسلم فهو كافر لقوله تعالى : ﴿وَمَنْ يَبْتَغِ غَيْرَ الْإِسْلَامِ دِينًا فَلَنْ يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِي الْآخِرَةِ مِنَ الْخَاسِرِينَ﴾ .

Qodobkan waxay uga danleeyihiin qaar in ay suufiyo yihiin isku sheega, laakiin aanan tasawufka xaqiiqadiisa waxba ka aqoon ayaa ku andacooda mararka qaar in

mashaa'iikhdooda aanan laga rabin salaad iyo soon iyo dhammaan waajibaadka kale oo dhan oo ay noqdeen qaar shareecada xukunkeeda ka baxsan ama laga cafiyay!!

Arrinkaas qof muslim ah dhihi mayo, ee qaar khusacbalaad iyo khuraafaad ka batay oo suufiyo sheeganaya ayaga oo aan ahayn ayaa ku andacooday, mana aha arrin hadda taagan oo wax mushkilo ah oo hadda manta muslimiintu ka socon la'yihiin maaha, sidaa darted, waxaa la rabay in ay aayaddu sida ay sheegayso, dhaan "**qofkii diin ka dhigta wax aan diinka islaamka ahayn waa gaal**" laakiin bal fiiri sida ay aayadda u leexinayaan oo ugu koobayaan koox yar oo dhowr qof in ay yihiin laga yaabo ama xataa laga yaabo in aanayba jirin hadda, maxaa yeelay anigu wali ma arag nin leh sheekhayga salaad lagama rabo, laakiin sheeko ayaan ku maqlay, sharcigana ma bannaana in lagu dhiso waxyaabo sheeko lagu maqlay oo aanan waaqici ahayn. Sidaa darted waxaa la rabay in ay dhahaan (Qofkii Islaamka mooyee diin kale raaca ama diin ka dhigta waa gaal).

Qodobka 10aad:

العاشر : الإعراض عن دين الله لا يتعلمه ولا يعمل به والدليل قوله تعالى : ﴿وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ ذُكِّرَ بِآيَاتِ رَبِّهِ ثُمَّ أَعْرَضَ عَنْهَا إِنَّا مِنَ الْمُجْرِمِينَ مُنْتَقِمُونَ﴾ ولا فرق في النواقض بين الهازل والجاد والخائف وكلها من أعظم ما يكون خطرا وأكثر وقوعا فينبغي للمسلم أن يحذرها ويخاف منها على نفسه .

Qodobkan waa mid ay wahhaabiyadu iska samaysatay ee cidna kuma raacsana, maxaa yeelay diinka barashadiisu waa fardukifaayo sida lawada ogyahay, haddii aysan diinka uga jeedin (ashahaatinka iyo macrifada Eebbe) taas haddii ay uga jeedaan waa sax laakiin hadalkooda sida ka muuqata diinka ayay dhaheen ayaga oo aan sheegin waxa ay uga jeedaan diinka, ma diinka oo dhan baa, ma ashahaatinka iyo macrifada Eebbe baa, mise waa wax kale?!

Waxaa loo baahanyahay in warka la faahfaahsho marka laga hadlayo arrimahan oo kale, maxaa yeelay waa arrimo aad u muhiim ah oo dadka lagu gaalaynayo.

Culumadu waxay dheen diinka waajibka ah ee farducaynka ah waa aqoonsiga Ilaahay ama macrifada Ilaahay, macnaha ashahaatinka barashadiisa, laakiin cilmiga intiisa kale waa fardukifaayo haddii dadka qaar bartaan qaarka kale wuu ka dhacayaa waajibku.

Marka waxaan la yaabay waxa ay wahhaabiyadu daliil ka dhigatay, bal fiiri aayadda ay soo daliilsadeen, waa aayad ku saabsan dadka gaalada ah ee diinka Islaamka aan aaminsanayn, ee diiddan in ay bartaan Islaamka ama soo galaan Islaamka.

Marka halkaas ayay kaaga caddaanaysaa in aanay muslim u arag wax aan kooxdooda ahayn, dadka muslimiinta ah ee aan kooxdooda ku jirin waxay u arkaan gaalo in ay yihiin, sidaa darted, qofkii aan ka baran diinta kutubtooda wahhaabiyadu qortay waxay u arkaan in uu gaal yahay ama muslim ha ahaado ama cid kale ha ahaadee!!

Kufriga iyo Kufrinta

Culumada Islaamku way ka hadleen arrinka kufriga iyo kufrinta, waxayna ku magacaabaan (axkaamta kufriyaadka), waxayna u qaybsheen sababaha lagu kufrinayo saddex qaybood:

1. Inkirmada Ilaahay ama sifooyinkiisa wax ka mid ah.
2. Shabbihidda Ilaahay lagu shabbahayo khalqigiisa ama sifooyinkiisa wax ka mid ah lagu shabbahayo.
3. Inkiridda diinka Ilaahay iyo nabiyaashiisa iyo rasuulladiisa iwm, sida malaa'ikta ama beenintooda.

Intaa ayaa sabab u noqon karta ayay dhaheen, kadibna waxay u qaybsheen qaababkiisa saddex:

1. Qowli (ama hadal) oo ah, weedha uu qofku ku hadlayo, tusaale ahaan haddii uu Eebbe u gafo oo caayo ama yiraahdo naag buu qabaa ama carruur buu leeyahay wim.
2. Ficli (ama fal) sida haddii uu kitaabka quraanka qashin ku dhex tuuro asiga oo liidid uga jeeda.
3. Ictiqaadi (aaminid) sida haddii uu aamino in Ilaahay circa kursi wayn kula fadhiyo ama uu u maleeyo in aanan Ilaahba jirin.

Waxyaabahaas saddexda ah daliilkoodu waa cadyahay oo quraanka ayaa dhammaantood lagu xusay, laakiin waxyaabaha ay wahhaabiyadu sheegtay dhowr ceebood ayaa lagu arkay sida aad adiguba aragtay ee munaaqashada kore ka muuqata waxaana ka mid ah:

1. Ayaga oo leexinaya aayadaha macnahooda.
2. Ayaga oo hadalka isku duubaya oo aan caddaynayn.
3. Ayaga oo aanan culumada hadalkooda wax qiime ah siinayn

Marka walaalayaal halaga digtoonaado kooxda wahhaabiyada, waxay caado ka dhigteen in ay hadalka leexshaan oo taxriifshaan oo umadda kufriyaan, sidaa darted, maadaama ay ina kufrinayaan oo aysan Islaam in aan nahay noo arag annaguna waan kufrinaynaa oo gaalo in ay yihiin ayaan ku xugminaynaa, maxaa yeelay annagu waan hubnaa in aan Islaam nahay, haddii ay kolka ina kufriyaan waxaa halkaa ka cad in ay ayagu kufaar yihiin, maxaa yeelay qofkii muslimiinta kufriya asiga ayaa kaafir ah, marka shartooda iyo kufrigooda ha laga feejignaado inshaa allaahu, fidnadoodana Ilaahay halaga magan galo.

Wa billaahi attowfiiq.

Dr. Hersi Aw Mohamed

Sydney, Australia 18/07/2005